

Nexus' daraasad meelo kala duwan oo dalka ah laga soo sameeyay oo ku saabsan waxyeelooyinka dhanka caafimaad iyo dhanka dhaqaale ee COVID-19 uu u geystay bulshooyinka Soomaaliyeed

Juun iyo Luulyo 2020 oo dhan, Nexus, oo ah dallad ay ku mideysan yihiin ururo aan dawli ahayn oo Soomaaliyeed, waxay samaysay daraasad dalka oo dhan ku saabsan si loo fahmo saamaynta caafimaad iyo tan dhaqaale ee COVID-19 uu u geystay bulshooyinka Soomaaliyeed ee ku dhaqan magaalooyinka, miyiga iyo xeryaha barakacayaasha ee dalka gudihiisa ah.

Cilmibaarista ayaa waxaa lagu sameeyay 4,735 qof oo qaan gaar ah (18+ sano jira) oo ka socda magaalo, miyi iyo xeryo barakacayaal oo kuyaal 17 gobol. Qariidadu waxay muujinaysaa inta qof ee gobol waliba uga qeyb qaatay.

